

# Kharashyada codsiga ruqsada degenaanshada ama ruqsada shaqada shaqada iyo xaalada degenaanshada joogtada ah

Lacag ama kharash ayaa la bixiyaa markii qofku u codsanaayo ruqsada degenaanshada, ruqsada shaqada ama xaalada degenaanshada joogtada ah ee dalka Iswiidan.

Codsadeha:

- waa in had iyo jeer u bixiyaa kharashka codsiga, iyadoo fiirogaar ah la siin goobta u ka codsanaayo
- lacagta u bixiyay looma soo celinaayo si kasta jawaabta codsigiisa ha noqotee
- hal kharash oo keliya ayuu qofku bixinaya haddii uu ruqsada degenaanshada iyo ruqsada shaqada u isla markii codsado
- qiimaha ruqsada cusub iyo cusbonisiinta waa isku mid.

## Kharashka codsiga waa sidatan

Ruqsada shaqada ..... 2 000 kar  
Cusboonisiinta ruqsada shaqada waa haddii isla xirfada ama isla shaqo-bixiyaha.....1 000 kar

Ruqsada degenaanshada ee ganacsateyaasha .....2 000 kar

Ruqsada degenaanshada cilmibaareyaasha martida ah.....1 000 kar

Ruqsada, tusaale booqashada, is-waydaarsiga caalamiga (fanaaninta, kuwa loo yaqaanno “au pair”, ciyaartooyda, tababbare, is-waydaarsiga dhallinyarada) iyo waxbarasho.

Qof wayn .....1 000 kar  
Carruur (ka hooseya 18 sano ) ..... 500 kar

Ruqsada dadyoow ruqsada degenaanshada joogtada ah ku leh Midoowga Yurub  
Qof wayn ..... 1 000 kar  
Carruur ..... 500 kar

Ruqsada qaraabada dadyoow codsaday ama haysto – ruqsada kumeelgaarka ah, tusaale u sabab ah booqasho, shaqo ama waxbarasho.  
Qof wayn ..... 1 000 kar  
Carruur (ka hooseya 18 sano) ..... 500 kar

Ruqsada u sabab ah xiriir-qarabeedka qof dalka Iswiidan ku nool  
Qof wayn ..... 1 500 kar  
Carruur (ka hooseya 18 sano) ..... 750 kar

Kharashka codsiga degenaanshada joogtada ah  
Qof wayn ..... 1 000 kar  
Carruur ..... 500 kar

## Sidee lacagta loo bixiyaa?

*Codsiga ugu horeeyo ee safaaradda ama qunsuliyada*

Qofka marka ugu horeeyso ruqsada ka codsanaayo safaarad ama qunsuliyad, wuxuu kharashka bixinayaa goorta codsiga. Migrationsverket iyo safaaradaha/qunsuliyadaha ma hirgeliyaan isla nidaamka kharashka. Qofku warbixin faahfaahsan ammuurtaas ku saabsan wuxuu ka helia karaa safaarad ama qunsuliyadda ee uu booqday.

Codsiga cusboonisiinta ama xaalada degenaanshada joogtada ah. Kharashka waxaa la bixiya markii xafiisyada ammuuraha ruqsada ee Migrationsverket la booqanaayo ama iyadoo la adeegsado plusgiro.

Qofkii adeegsado plusgiro waa in afargeysta ku ag qoran ”Meddelande till betalningsmottagaren” ku qora magaciisa koowaad iyo kan qoyskiisa efternamn iyo tobbanka lambar ee aqoonsiga personnummer ama lambarka arrintiisa, taasoo ah arrin aad muhim u ah.

#### *Plusgironummer*

Lambarka plusgiro ee Migrationsverket waa:

- 95 78 46-9 waa haddii ammuurta ay ku saabsan tahay ruqsada degenaanshada ama ruqsada shaqada, u sabab ah shaqo, waxbarasho ama xaalada degenaanshada joogtada ah. Isla lambarkaas ayee adeegsan karaan qaraabada qofka codsaday ama haysto ruqsadaha noocaas ah.
- 445 58 11-2 waxaa loo adeegsada codsiga ruqsada degenaanshada /ruqsada shaqada u sabab ah xiriir-qarabeedka.

Waa in codsiga lagu qora habka kharash-bixinta ee la adeegsaday. Teeda kale, waa in lagu qora taariikhda lacagta la bixiyay, laguna soo lifaaqa warqada lacagta lagu bixiyay.

#### **Codsashada goobta Internetka la adeegsado**

Qofki isagoo adeegsanaayo goobta Internetka ee Migrationsverket codsado ruqsada shaqada ama cusboonisiinaayo ruqsada degenaanshada u sabab ah waxbarasho, waa in kharashka codsiga uu isla goobtaas ka bixiya. Wuxuu lacagta ku bixin karaa isagoo adeegsanaayo kaararka loo yaqaanno kontokort/betalkort ama toos bangiyada qaarkood. Kuwa bangiyadaas ay yihiin waxay ku qoran yihiin goobta Internetka.

#### **Ka reeban**

Dadyoowga oo idil ma bixiyaan kharashka codsiga. Dadyoowga hoos ku xusan, kharash l’aan ayee codsan karaan ruqsada degenaanshada/ ama ruqsada shaqada:

- Magangelyo-dooneyaasha dalka Iswiidan.
- Labada qof is-qaba, sharci ahaan isla-nool iwm iyo carruurta da’dooda 18 sano ka hoseeyaan oo codsady ruqsada degenaanshada, u sabab ah shisheeye dalka Iswiidan laga siiyay ruqsada degenaanshada, u sabab ah baahi badbaadin ama ay jirto xaalad aad u gaar ah.
- Xubnaha qoyska qof jinsiyadiida ay tahay Midoowga Yurub/Isbahaysa dhaqaalaha Yurub EU/EES.
- Qofka jinsiyad ka haysto Midoowga Yurub/Isbahaysa dhaqaalaha Yurub EU/EES.
- Qofka dalka Switzerland jinsiyad ka haysto iyo xubnaha qoyskiisa.
- Qofka dalka Jaban jinsiyad ka haysta.
- Ardayda wax ka barata jaamacadda Världssjöfartsuniversitetet magaalada Malmö.
- Ardayda deeq waxbarasho ka haysato hey’ada Sida ama urur kale ee iswiidisha ah, ama urur dadwaynaha, sida kuwa Midowga Yurub ama Unicef.